

Ha daahin daryeelka xaaladaha degdegga ah

Reer Minnesota ayaa haddii aad qabtaan xaalad caafimaad oo degdeg ah, waca 911 isla markaaba.

Reer Minnesota ayaa hawl fiican qabanaya markay guriga joogaan iyaga oo markaana gaabinaya fiditaanka COVID-19.

Hase ahaate, xog ayaa muujineysa inay dad intii hore ka yar oo qaba astaamaha faaligga iyo wadne qabadku ay wacayaan 911 ama booqanayaan qolalka xaaladaha degdegga ah.

Waxaan rabnaa inaan hubino in reer Minnesota aysan daahin helitaanka daryeelka muhiimka ah sababta oo ah ka cabsiga cudurka COVID-19.

Nidaamkayaga daryeelka caafimaadku waa aammin oo wuxuuna diyaar u yahay in la daweeyo bukaannada ay la soo gudboonaato xaalad caafimaad oo degdeg ah.

Haddii aad qabto xaalad degdeg ah oo caafimaad, wac 911 isla markiiba.

Taas waxa ka mid ah dhiigitaan aan joogsan, dhibaatooyin neefsasho, miyir beel kedis ah, ama astaamo faalig ama wadne qabad.

Helitaanka daryeelka dhakhso ah ayaa badbaadin kara noloshada.